



# 1

## Kow

Saaxiib kasta oo aad ifka isku seegtaan saaxiibtinnimadiisu waxa ay kugu reebtaa xusuusteeda gaarka ah.

Casar liiq ah ayaan soo gaadhay halkii aan u socdey. Si ba'an ayaan u xiiqsanaa. Waxa aad moodaysay in wadnuhu isku kay soo gufeeyey kalxamaha hoostooda oo uu kor u soo dhaafi kari waayay halkaa. Waxa cidhiidhi igu noqotey neefta, indhahana waxa aad moodaysay in ay cadaadis hoose dareemayeen. Waxa aan is hoos taagay geed qudhac ah, oo aan ku yara nastay. Waa xilliyadaan ku tilmaamo mar la arag ee dhif iyo naadirka igu soo mara. Waxa aan ahaa keligey. Haddana si ayaan isugu buuqaayay. Waa ay adag tahay sideedaba, oo bulshadan dhexdeeda waligaa cidla ku noqon maysid. Cid uun baa kula joogta mar kasta iyo meel kasta. Tusmooyin badan oo kala duwanina muddo aad u yar ayay mar ku wada dhacayaan. Ma helaysid xilli aad ku kala horto, waayo xaqiiqooyin xidhiidhsan, oo midiba mudnaanteeda gaarka ah leedahay ayaa haddana marar isku dhow wada imanaya.

Saacaddu waa lixdii iyo badhkii galabnimo. Cadceedda oo markaas uun baalka dhigatay, ayaa dhirta iga xigta dhinaca galbeed, waxa ay dusha kaga samaysay casuus khafiif ah. Halkaa hortayda, meeshii uu iskuulku mar ahaa, waxa ka baxay wadiiqooyin yaryar oo cagtu ku dul samaysay doogga yar ee wali sii cawlan, ee ka dhex baxay daaraddii iskuulku ka dumay. Eedaan ayaan meel iga durugsan ka maqlayaa, waxa uu ka imanayaa masaajid aan minaarad lahayn. Tuulo-joogga ka sii baxaya magaalada, ee galbeed u carraabayaana, waxa ay isu sii daba socdeen dhinacaa cadceeddu u sii dhacayso, iyaga oo aan wada hadlaynin. Waxa ay u xidhiidhsanaayeen sidii awr isku faruur xidhan, oo mid kasta ka ka horreeya ayay tallaabadiisu la xawli ahayd. Iyaguba sida ilayska cadceeddu degdeg ugu sii libdhayo, ayay ugu degdegayeen reerohoodii; iyaguba qudhoodu waxa ay taqsiisanaayeen qaad, caagad qaab daran oo ay saaka caana ku keeneen magaaladana tuurta ayay ku siteen. Qaarkood waxa ay qiijinayeen xabbad sigaar ah.

Waxa aan iska hoos fadhiistey geedkii qudhaca ahaa. Waxa geedkan ag mara waddo raf ah. Raadka labada taayir ee gawaadhidu, waxa ay dhexda ka sameeyeen tuul yar oo ciid ah. Halkeer dhinacayga waxa ka ciyaya ey, anna kolba waxa aan dhawrayaa inta ay ii soo jirto cida eygu. Waxa horteyda maraya kolanyo jinac duullaan ah, oo kolba isku dayaya in ay ka gudbaan waddada, iyaga oo xidhiidhsan. Waxa ay afka ku sidaan jajabyo madow ah oo ili maqabatay ku dhow, oo aanan garanayn waxa ay ka samaysan yihiin. Waa wax u eeg ugxanta raha, inta aanu midhaxareedaad noqon. Markasta oo gaadhi soo maroba, ama tuulo-joog carraabayaa waddada ka tallaaboba, kabta iyo shaaggu waxa ay kala daadinayaan silsiladda nafleyda ah ee xidhiidhsan, ee isxilqaanka iyo kartida badani ka muuqato. Jinac duullaanka in badan baa ka dhimata oo shaaggu

dilaa, in kalena way ka badbaaddaa shilka soo noqnoqonaya; waxa ayse bulshada jinaca ee safarka ahi ku adkaystaan halgankooda ah in ay ka tallaabaan waddada. Taayir kasta oo jiidhaa, ama addinka isku dultaagaa, waxa uu keenayaa in yar oo qas iyo isdhexyaac ah. Qaskaasi waxa uu socdaa wax aan ka badnayn ilbidhiqsiyo, haddana si falcelin la yaab leh ayay kooxda jinacu isu faylisaa; sidii siidhi loo tumay ayay silsiladdii nafleyda ahayd dib ugu samaysantaa. In digtoonow la yidhi baad mooddaa, oo mooyi si ay u wada hadlaane, sidii ay gaardi ku jiraan ayay isugu toosiyaan laynka, oo mar kale bilaabaan socodkoodii dheeraa. Midh-midhbaa mar-mar jiho kale u leexda, haddana sidii loo yeedhay ayuu soo kala xeelaa, oo ku daba faylaa inta kale.

Neecawda yar ee dhacaysay ayaa beddeshay jihadii ay u socotey, markaas ayay jale u noqotey silsiladdii jinaca xidhiidhsan, oo u sii riixday xagga koonfureed ee ay u tallaabayeen. Daadkan cayayaanka ah ee sida deggan ee nidaamka leh u socdaa, waxa uu u ququlayay horteyda si joogto ah, oo aayar-aayar ah. Qaarkood baa ku guulaystay in ay ka tallaabaan waddada. Aniguna si dareen hoose leh ayaan u dhuganayay hawlkarnimadooda. Ha isaga itaal darnaadaan mid-mid e, waxa aan ugu hanwaynaa bulshada jinaca dedaalkooda wadareed iyo ku-madax-adaygooda hiraalka leh in ay geerida ugu badheedhaan, sidii ay uga gudbi lahaayeen waddada, oo midkood u dhinto wax dan u ah bulshada jinaca inteeda kale.

Dhinaca kale ee dariiqa waxa iiga muuqda wixii ka sii taagnaa gidaarka iskuulkii xaafadda ka dhisnaan jirey mar. Waxa la burburiyey baa la igu yidhi intii dagaalku socday. Maalin dhowaydna miino lagu aasay waa hore ayaa ku qaraxday carruur ku ciyaaraysay gidaarka dhexdiisa. Waxa aan maqlay dhallaan baa ku geeriyooday halkan, markii aan imidna waxaa baan arkay dhulkii iskuulka oo qaybo ka mid ah loo beddelay xabaalo, oo loo ooday dad waa hore lagu aasay iyo kuwa cusubba. Xabaalaha dayrka dhexdiisu si aan qaab sugan lahayn ayay isaga soo horjeedeen. Uma ay kala dhaxayn dhowr tallaabo labadii xabaaloodba, dhinacna uma ay wada jeedin, sida xabaalaha caadiga ah. Qaarbaa lahaa dhagaxaan ku dayran. Qaarbaa dhinac ka daloolay. In kale oo aan sidii xabaalba loo qodin, ee inta qiyaastii cagaf lagu qaaday ciidda, dhowr mayd mar lagu wada rideyna, waxa ayaamahaa soo saaray roobkii waynaa ee ka da'ay magaalada. Maydka qaarkii baa calal dhar ah wali sitey.

Safarkii jinac duullaanka ayaan mar kale ku jeestay. Habdhaca ay isu daba socdaan xubanaha jinac duullaanku, waxa aad moodaysay in durbaan loo tumayo. Midiba ka ka horreeya ayaad moodaysay in sankiisu salkiisa taabanayo oo ay urta ku wada socdaan, haddana wax is dhexyaac ah iyo is jiidh-jiidh toona kuma imanayn hannaan socodka. Mar-mar buu ka ugu horreeyaa is taagayay, ilbidhisqsi gudihiina silsiladda oo dhan baa is taagaysay, iyada oo aan wax is duqayn ahi imannin. Intii aan dhuganaayay socodkooda ma aan dareemin isaga oo mid dhexda ku jiraa istaagay isaga oo aan amar ka helin ka horreeya. Waxa aan soo daba galay silsiladdii ilaa aan soo gaadhay dundumo aad kor ugu dheer oo bulshada jinacu ka ag qodatay god hoos u dheer. Sida ay ugu qulqulayeen godka dhulka hoostiisa ah, waxa aan ka fekerey in ay dhisteen bulshada intaas fara le'egi god dhulka hoostiisa ku yaalla oo tiradaas oo dhan qaadi kara. Waxa aan haddana ka fekeray itaalka aboorka sameeyey dundumada intan le'eg, ee dhulka sare uga qaadey.

Aboorku ka itaal daran jinac duullaanka, jidhkiisuna uga nugul cadceedda oo dubkiisu waa

biyo. Habeenkii ayuu debedda u soo baxaa si uu dhoobada candhuuftiisa ugu qooyo oo dundumada debedda uga dhiso. Bulshada aboorku waxa ay ta jinac duullaanka la wadaagtaa kala danbaynta, isu hoggaansanaanta, wada shaqaynta, kartida wadareed iyo u dhimashada midkood u dhinto sida bulshada aboorka inteeda kale u badbaadi lahayd dhibaato. Bulshada aboorku iskama noola e midkiiba meel iyo manco ayuu u noolyahay: boqoraddu way dashaa; kooxda tarankuna waxa ay isugu jiraan lab iyo dheddig, shaqadooduna waa in ay rimiyaan boqoradda cuntana afka ugu guraan; kooxda shaqaaluhuna waxa ay isugu jiraan iyaba lab iyo dhedig laakiin waa ma dhalays oo dundumada ayay dhisaan cuntona way soo xereeyaan; kooxda askurtana waxa ay difaacaan guriga iyo bulshada inteeda kale, dundumadana waligood kama baxaan. Askarta aboorku wax ma dhalaan, wax ma dhisaan, isma quudin karaan kaligood, oo shaqaalaha ayaa iyaga afka wax ugu gura. Waxa ay u nool yihiin in haddii qudhaanjo soo weerarto, oo ay ugu soo gasho dundumada dhexdeeda, ay gadoodaan oo difaacaan bulshada inteeda kale iyo boqoradda.

Aboorku waxa uu isku quudiyaa loox, caleemo iyo xididdada dhirta qaarkeed, waxana soo gura shaqaalaha oo candhuuftooda ku qooya oo mila, marka ay naftooda wax u cunaana aboorka kale ee aan is quudin karin, sida askarta iyo boqoradda, afka ku siiya cuntada. Waxa aan mar kale waxoogaa jeedaaliyey dariiqii dheeraa ee ay silsiladda jinac duulaanku u qulqulaysay, waxaan barbardhigey silsiladdan kale oo aboor ah oo markaas uun ka soo baxaysay dundumada, si ay fiidkan u dhisaan hoygooda. Waxaan tuhmay sida ay hadhimo ugu kaydsanayaan xilliga soo socda ee aanu qadhaabku suuro gal u noqon doonin. Dabaysha yar ee dhacaysaa aboorka waxa ay ku haysaa dhib oo kolba qaarbaa ka dhacaya dundumada, laakiin dib u soo fananaya sidii ay u qoyn lahaayeen dhoobada. Waxa aan ka fekeray dedaalka nafleydan mid-midka u itaalka yar, laakiin dareenka hoggaansan iyo nidaamka, isfahanka xubnahooda iyo wada shaqayntoodu tahay awoodda bulshadooda. Waxa aan ka fekeray wax wada qabsigooda iyo kala danbayntooda. Xaqiiqdu waxa ay tahay in cayayaankan aadka u itaalka darani uu dhisay dundumadan intaa le'eg ee aan hoos imi. Kor ayaan u eegay, mise waa sidii fooq haddii loo eego xajmiga aboorka, marti gelin karaya in ka badan milyan xabbadood oo aboor ah. Waa duni dhan. Waa hoy astura bulshada aboorka oo laga dhisay isla halkii laga dumiyey iskuulkii lagu dhex diley carruurtii uu hoyga u noqon lahaa. Boqolaal aboor iyo jinac duullaan ah ayaa hortayda ku dhintay sidii ay u dhisi lahaayeen dundumad intan le'eg, ama u qodi lahaayeen guriga dhulka hoostiisa ah; boqolaal rag ahina waxa ay u dhinteen sidii ay u dumin lahaayeen gidaarka iskuulkan, una gumaadi lahaayeen dhiggooda. Waxa aan ka fekeray in ay kala jirto "dhimasho" iyo "dhimasho": laba dhimasho oo kala dhegroon, oo labduba ku yimi isla boqcad dhul ah.

Anna waxa aan dul taaganay boqcaddii.

Gidaarka iskuulku waa halkii la iigu sheegay in ay ugu war danbaysay intii Mahdi la socotey maalintii isagaba ugu warka danbaysay. Saaxiib kasta oo aad ifka isku seegtaan saaxiibtinnimadiisu si gaar ah ayay kuu gu reebtaa xusuusteeda. Waxa aan xusuustey, intii aan halkii fadhiyey, noloshii carruurnimo ee aannu soo wada marney aniga iyo Mahdi iyo saaxiibtinnimadayadii.